# Inbjudan att delta i ett forskningsprojekt om karies hos barn, Somaliska

**Martiqaad ku saabsan ka qaybgalka mashruuca cilmi-baarista ku saabsan suuska ama boloolka ku dha ilkaha carruurta**

Waxaan rabnaa inaan ku weydiino haddii adiga iyo ilmahaaga aad rabtaan inaad ka qaybqaadataan mashruuca cilmi-baarista. Dukumintigaan waxaad ku heli doontaa macluumaad ku saabsan mashruuca iyo waxa ka qaybgalka uu ka dhigan yahay.

## Waa maxay mashruucaan iyo sababta aan rabno inaad ka qaybqaadato?

Suuska ama boloolka ilkaha ayaa sii kordheya ugu gaar ahaan carruurta yar-yar, gaar ahaan kuwa 6-jirka ah. Waan ognahay in khatarta suuska ama bolooka ilkaha ay saameeyaan nadiifinta ilka iyo caadooyinka cunto. Waxa kale oo ay jiraan xiriirro ka dhexeeya suuska ama boloolka ilkaha iyo bakteeriyada afka, xaaladaha bulshada iyo deegaanka ee carruurta ku nool yihiin, laakiin waxaa jira wax badan oo arrimahaas aanan wali la fahamsaneyn.

Ujeeddada mashruuca waa in la baaro waxa ka hortaga suuska ama boloolka ilkaha carruurta 6-jirka ah iyada oo la baarayo caadooyinka caafimaadka afka, caadooyinka cunto, bakteeriyada afka, iyo soo-gaadhista kiimikooyinka ka yimaada balaastikada laga soo aruuriyo aragtida daryeelayaasha caafimaadka ee caafimaadka afka ee carruurta. Fahamka fiican ee arrimaha ka hortagga waxay ka caawin kartaa hagaajinta caafimaadka afka ee carruurta da'da yar.
**Sababta la guguu soo bandhigayo inaad ka qaybqaadato cilmi-baarista waxay tahay in ilmahaaga uu gaarayo 6 jir sanadka 2024, taasoo ka dhigaysa inuu heli doono wargelin ka timid Folktandvården oo loogu talagalay baaritaan caadi ah ee caafimaadka afka.**

Macluumaadka xiriirkaaga waxaa laga helay rugta caafimaadka ilka ee Folktandvården. Jaamacadda Karlstad iyo Gobolka Värmland ayaa ah hoggaamiyeyaasha cilmi-baarista ee mashruucaan. Ansixinta cilmi-baarista waxaa bixisay Hay'adda Qiimaynta Anshaxa (Etikprövningsmyndigheten) oo leh lambarka diiwaanka Dnr 2023-05861-01.

## Sidee ayuu u shaqeeyaa mashruuca?

Markaad ka qaybqaadato daraasaddan, macnaheedu waa inaad, adiga oo ah daryeelaha, laguu weydiiyo oggolaanshahaaga in ilmahaaga uu qayb ka noqdo daraasadda. Iyadoo la raacayo macluumaadkaaga, waa lagu weydiisan doonaa inaad ogolaato ka qaybqaadashada ilmahaaga daraasadda. Haddii aad rabto inaad hesho macluumaad afka ah, fadlan la xiriir mid ka mid ah shaqsiyaadka ku qoran macluumaadka hoos ku xusan.

Ka qaybqaadashada ilmahaaga waxay ka dhigan tahay in macluumaadka caafimaadka afka ilmahaaga (sida suuska ama boloolka ilkaha iyo wixii la mid ah) la aruuriyo intii lagu guda jiray baaritaanka caadiga ah. Waxa kale oo aan ka qaadi doonaa candhuufta ilmahaaga iyadoo la dhigay  suufaf yar ah afka ilmahaaga muddo labo daqiiqo ah. Booqashada waxay noqon doontaa sidii baaritaanka caadiga ah, laakiin waxay qaadan doontaa waqti dheeraad ah, qiyaastii 10 daqiiqo dheeraad ah.

Waxaan sidoo kale ka codsan doonaa inaad naga caawiso ururinta muunad kaadi (10 ml) oo ka socota ilmahaaga. Waxaad u gudbin doontaa muunada kaadida shaqaalaha caafimaadka ilkaha. Waxa kale oo aad heli doontaa agabka ururinta iyo tilmaamaha markii lagugu wargeliyo baaritaanka, kadib markaad ogolaato ka qaybqaadashada.

Ka qaybqaadashada waxa kale oo ay ka koobnaan doontaa inaad buuxiso su'aalo ku saabsan asalkaaga, caadooyinka iyo aragtidaada caafimaadka afka, iyo caadooyinka caafimaadka afka ee ilmahaaga. Su'aalaha waxay sidoo kale dabooli doonaan caafimaadka iyo arrimaha nolosha. Buuxinta su'aalaha waxay qaadan doontaa 20-30 daqiiqo waxaana lagu samayn doonaa intii lagu guda jiray baaritaanka ilmahaaga. Su'aalo isku mid ah ayaa loo diri doonaa dhammaan daryeelayaasha ilmahaaga da'da ah ee Värmland.

Intii lagu guda jiray booqashada, adiga oo ah daryeelaha, waxaa laga yaabaa inaad sidoo kale lagugu martiqaado inaad ka qaybqaadato wareysi mar dambe. Wareysigu wuxuu diiradda saari doonaa khibradahaaga caafimaadka afka iyo daryeelka ilkaha ee ilmahaaga. Wareysigu wuxuu ka dhici doonaa meel iyo waqti aad doorato, waxaana lagu qiyaasayaa inuu qaadan doono qiyaastii 30-60 daqiiqo. Wareysiga waxaa qaban doona cilmi-baare waxaana la duubi doonaa oo kadib la qoridoonaa (la turjumidoonaa).

## Suuragalnimada iyo khataraha la xiriira ka qaybqaadashada mashruuca

Baaritaanka caafimaadka ee ilmahaaga waa sidii baaritaanka caadiga ah, waxaana la raacayaa hagayaasha rugta caafimaadka ilkaha. Tijaabada candhuufta waa tallaabo caadi ah oo la sameeyo xarumaha caafimaadka ilkaha waxaana sameeya shaqaalaha caafimaadka ilkaha ee khibrada leh.

Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu u arko in baaritaanka afka uu yahay mid aan raaxo lahayn, gaar ahaan haddii uu leeyahay khibrado xunxun oo hore ama uu yahay mid ka baqaya caafimaadka ilkaha. Haddii ilmahaaga uu dareemo raaxo-darro intii lagu guda jiray baaritaanka, wuxuu joojin karaa baaritaanka wakhti kasta.

Su'aalaha wareysiga iyo su'aalaha xitaa ma jiraan khataro. Su'aalaha qaarkood iyo wada-sheekeysiga wareysiga waxay noqon karaan kuwo lagu xujeeyo laakiin waxaa lagu maareyn doonaa sida iska doonta. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan dhibaatooyinka caafimaadka afka ee ilmahaaga, wadahadal iyo talooyin dheeraad ah ayaa lagugu siin doonaa caafimaadka ilkaha.

## Ka qaybqaadashadu waa ikhtiyaari

Ka qaybqaadashadaada iyo ilmahaaga waa mid ikhtiyaari ah waxaadna joojin kartaa wakhti kasta. Haddii aad ama ilmahaagu doorataan in aanad ka qaybqaadan ama aad rabtaan inaad joojiso ka qaybqaadashada, uma baahnid inaad sheegto sababta, mana saameyn doonto daryeelkaaga ama daaweynta mustaqbalka. Haddii aad ama ilmahaagu rabto inaad joojiso ka qaybqaadashada, la xiriir masuulka mashruuca (eeg hoos).

## Sideen ku heli karaa macluumaadka natiijada mashruuca?

Natiijooyinka mashruuca waxaa si joogto ah loogu daabici doonaa maqaallo iyo shirar cilmiyaysan oo Iswiidhish iyo caalami ah. Waxaad heli kartaa natiijooyinka adigoo la xiriiraya masuuliyiinta mashruuca (eeg hoos).

## Maxaa ku dhaca macluumaadkayga iyo ilmahayga?

Mashruuca wuxuu uruurin doonaa oo diiwaan gelin doonaa macluumaadkaaga iyo ilmahaaga. Waxaan kaydin doonaa macluumaadka iyo muunadaha aad bixiso intii lagu guda jiray baaritaanka caafimaadka si aan u barbar dhigno caafimaadka afka ilmahaaga iyo carruurta kale. Jawaabahaaga iyo natiijooyinkaaga waxaa loo maareyn doonaa si aan cidna aan la ogaan karin. Macluumaadka waxaa lagu kaydin doonaa nidaamka IT-ga oo leh amniga ku filan si loo kaydiyo macluumaadka gaarka ah. Marka cilmi-baarayaashu ay maareynayaan macluumaadkaaga, magacyada, lambarkaaga aqoonsiga iyo cinwaankaaga waxaa loo beddeli doonaa kood ID. Tani waa in macluumaadkaaga aan si toos ah lagugu garan karin. Koodhka waxaa heysta kaliya qofka mas'uulka ah, waxaana lagu kaydin doonaa si aan cidna loo ogaan karin. Sida ku cad xeerarka cilmi-baarista, macluumaadkaaga waxaa la kaydin doonaa muddo 10 sano ah kadib dhammaadka mashruuca cilmi-baarista, kadibna waa la tirti doonaa (lagu burburin doonaa).

Macluumaadka (boga caafimaadka iyo su'aalaha) waxaa loo beddeli doonaa nambarro oo waxaa lagu falanqeyn doonaa si tirakoob ah. Tirakoobka wuxuu sheegi doonaa kaliya sida daryeelayaasha guud ahaan ama sida carruurta guud ahaan ay u arkaan xaalado gaar ah. Ma jirto cid adiga ama ilmahaaga kugu garan karta warbixinta.

Waxaa lagugu wargelinayaa haddii ay jiraan wax khaladaad ama haddii uu jiro wax cusub oo saamayn kara ka qaybqaadashadaada cilmi-baarista.

**Sida loola xiriirayo masuuliyiinta mashruuca iyo masuuliyiinta guud ee habka macluumaadka**

Waxaa lagugu martiqaaday inaad nala soo xiriirto haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah. Waxaad la xiriiri kartaa masuuliyiinta mashruuca:

Magaca Cilmi-baaraha (cinwaanka, telefoonka, e-mailka)

Ulrika Lindmark, projektansvarig
*Professor i Oral hälsovetenskap, Karlstads universitet*
E-post: ulrika.lindmark@kau.se
Telefon: 054 700 25 29
Ann-Catrin André Kramer, forskare
*Doktor odontologi/lektor, Karlstads universitet*
E-post: ann-catrin.kramer@kau.se
Telefon: 054 700 21 93

Tita Kirkinen, tandläkare och forskare
*Specialisttandläkare barntandvård, doktor odontologi*
*Folktandvården Region Värmland*
E-post: tita.kirkinen@regionvarmland.se
Telefon: 010 831 94 90